

## Schizophrenia

Schizophrenia waa xanuun maskaxeed oo halis ah. Dadka qabaa waxa dhici karta inay maqlaan codad aan jirin. Waxa dhici karta inay u qaataan dadka kale inay isku dayayaan inay waxyeelaan.



Mararka qaar macne ma sameeyo hadalkoodu. Xaaladdu waxay ku adkaysaa inay shaqo sii joogaan ama naftooda daryeelaan.

Astaamaha Schizophrenia waxay sida badan bilaabmaan da'aha u dhexeeya 16 iyo 30 jirka. Ragga sida badan astaamuhu waxay ku bilaabmaan da' yaraan marka haweenka loo eego. Dadku sida badan ma yeeshaan Schizophrenia 45.



Waxa jira saddex nooc oo astaamo ah: Astaamaha saykootiga waxay leexiyaan fekerka qofka. Kuwan waxa kamid ah isla-sheekaysi (maqlidda ama arkidda waxyaabo aan jirin),

habaw (ictiqaadyo aan dhab ahayn), dhib ku mudasho nidaaminta afkaarta, iyo dhaqdhaqaaq cajiib ah.

Astaamaha "taban" waxay ku adkeeyaan inuu muujiyo dareeno iyo inuu si caadi ah u shaqeeyo. Qofku waxa dhici karta inuu u muuqdo mid niyad-jabsan oo baxsan.

Astaamaha garasheed waxay saameeyaan habka fekerka. Tan waxa kamid ah dhib ku qabid isticmaalka macluumaadka, qaadashada go'aamada, iyo baraarugsanaanta.

Cidna ma hubto waxa keena schizopshrenia. Hidde-sidaha, bey'adda, iyo kimistariga maskaxdaada ayey dhici kartaa inay door ku leeyihiin.



Daawo ma leh. Daawada ayaa ka caawin karta xakamaynta astaamo badan. Waxa dhici karta inaad isku daydo daawooyin kala duwan si aa u ogaato ta kuugu fiican.

Waa inaad ku joogto daawadaada ilaa iyo inta dhakhtarkaagu ku taliyey.

Daawayno kale ayaa ku caawin kara si aad ula tacaasho xanuunkaaga maalin ilaa maalin. Kuwan waxa kamidah daawayn, waxbarasho qoys, dhaqancelin, iyo tabobarro xirfadeed..

Text is public domain from the MedlinePlus Health Topics Introductions series This work is licensed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/us>

**A Healthy Roads Media project**

[www.healthyroadsmedia.org](http://www.healthyroadsmedia.org)

Schizophrenia (Somali) - Last Reviewed 2015